Xaqiiqooyinka Dhabta Ah Ee Ku Saabsan

# Gudniinka Fircooniga Ee Hablaha

(Ama **FGM** / **Gudniinka Hablaha** / **jarrida hablaha**)




Waxaa soo saaray Networklearning Team

Mahadnaq waxay u sugnaatay Dr. Comfort Momoh MBE xaga warbixinta iyo wargelinta



networklearning.org

Waxaa daabacay Stichting Networklearning, July 2014

# Tusmo


1 **Muxuu yahay gudniinka fircooniga?** 3

2 **Halkee iyo goortee bay hablaha ku sugan yihiin halis?** 4

2.1 Faafitaanka juqraafiyeed ee gudniinka fircooniga 4

2.2 Da'da hablaha la gudo 5

2.3 Caadooyin dhaqameedka gudniinka fircooniga 5

3 **Saameynta gudniinka fircooniga** 6

3.1 Khatarta ka imaan karta gudniinka 6

3.2 Khatarta ka imaan karta gudniinka 6

3.3 Dhibaatooyinka nololeed ee soo gaara jirka 6

3.4 Halista xiliga dhalmada 7

4 **Maxaa loo sameeyaa gudniinka fircooniga** 9

5 **In isbedel lala yimaado** 10

5.1 Fahamka cilmiga hada socda, dabeecadaha iyo caadooyinka 10

5.2 Kaalinta dhaqtarka, kalkaalisada iyo daweynta 11

5.3 Txubnaha muhiimka ah ee isbedelka 13

5.4 Hey'adaada kaalintee bay ka qaadan kartaa 13

6 **Tixraac iyo akhris dheeraad ah** 16


…Waxa ay ayeeydeey ku tilmaantay sadexda xaaladood ee murugada hablaha; waxay tiri "Maalinta gudniinka, habeenka arooska, iyo xiliga dhalmada ayaa ah sadexda xaaladood ee murugada ee hablaha"; xiliga dhalmada waxaan u ooyaa kaalmo; markii jirkii la jeex jeexay uu sii kala dilaaco; naxariis ma jirto "Riix" sidaas ayay yiraahdaan."Waa uun xanuun hablaha oo kaliya soo mara"

**– Dahabo Ali Muse**

# 1 Muxuu yahay gudniinka fircooniga?

Gudniinka fircooniga waa qaliin lagu jaro ama lagu dhaawaco xubnaha dareenka ee kore ee hablaha.

***Dhaawac intee le'eg ayaa gaara hablaha?***

Gudniinka fircooniga waxaa loo kala saaraa sadex marxaladood oo kala duwan taasoo ay soo saareen kuwa wax darsa:

- **Nooca gudniinka I:** Kintirka ayaa la jaraa.
- **Nooca gudniinka II:** Kintirka iyo baalashiisa ayaa la jaraa.
- **Nooca gudniinka III:** Waa mid ka sii xanuun badan kadibna tolmo la sameeyo. Habkaan gudniinka waxaa lagu magacabaa "Tolmo" Eeg sawirka.
- Waxa kale oo jira **nooc gudniin IV,** kaasoo mara marxalado kala duwan iyo dhaqamo kala duwan leh halkaasoo xubnaha dareenka hablaha lagu hagaajiyo ayada oo la xoqaayo, Lana hoolo Lana fidiyo iwm.












# 2 Halkee Iyo Goortee Bay Hablaha Ku Sugan Yihiin Halis?

## 2.1 FAAFITAANKA JUQRAAFIYEED EE GUDNIINKA FIRCOONIGA

Ayada oo ay sii socoto tirada, waxaa jira 29 wadan oo ku kala yaal Afrika iyo Bariga dhexe halkaas ay caado ka tahay gudniinka fircooniga, waxaa jira 125 milyan oo hablo iyo gabdho oo si xun loo jar jaray xubnahooda taranka. **(ref 1)**




- **Afrikada Galbeed** – wadamada sida Mali, Burkina Faso iyo Senegaal, noocyada gudniinka fircooniga I iyo II caan ayuu ka yahay. Mar kasta way adag tahay in la kala saaro labada nooc ee gudniin maxaa yeelay dumarku dhif dhif ayay helaan cilmi aqooneed ku filan ay ku ogaadaan nooca gudniinka lagu sameeyay, kuwa howsha fulinaayo waa la mid ayaguba. Nin hablaha guda oo ku nool tuulo ka tirsan wadanka Siiraa liyoon ayaa yiri: "Aniga waan jaraa wax alaale wixii ku dhex jira siilka". Nooca gudniinka fircooniga III ee tolmada ah kuma badna Afrikada Galbeed. **(ref 2)**
- **Afrikada Bari** wadamada ugu horeeya oo la beegsada hablaha gudniinka fircooniga waxaa ka mid ah Suudaan, Soomaaliya iyo Masar – sida caadada ah waxaa ka dhaca gudniinka fircooniga nooca III ee tolmada ah. **(ref 2)**
- **Bariga Dhexe** waxaa soo muuqaneyso in gudniinka fircooniga uu caadi ka yahay marka loo fiiriyo sidii loo maleyn jiray – tusaale ahaan waxaa laga helaa wadamada Cumaan, Sacuudiga iyo Yemen. Gobol ka mid ah Yemen ooh hal qabiil degen yahay in ka badan 80% hablaha waxaa la ogaaday in gudniinka fircooniga lagu sameeyay. **(ref 3)**
- **Aasiya** – gudniinka fircooniga wuxuu aad ugu baahsan yahay wadamada Indoneeshiya iyo Kurdistaanta Ciraaq. Wadanka darajadiiisa guud waxaa laga yaabaa in ay saameyn ku yeelato darajooyin mid sare iyo mid hooseyaba mid ama labo beelood. Sida Afrika oo kale, beel kasta waxay leedahay habkeeda dhaqameed ee isticmaalka gudniinka fircooniga.
- Gudniinka fircooniga waa dhibaato ku baahday oo heysata aduunka oo idil. 3 malyan oo hablood ayaa la gudaa aduunka sanadkii, ku dhowaad wadan kasta wuxuu leeyahay tiro badan oo dumar ah oo halis caafimaad ku jira. Tusaale ahaan, wadanka Ingiriiska waaka mamnuuc gudniinka fircooniga. – Ayadoo saas jirto, waxaa lagu qiyaasaa 22,000/- hablood oo halkaas ku nool in ay halis ku jiraan. **(ref 4)**

## 2.2 DA'DA HABLAHA LA GUDO

Gudniinka fircooniga waxaa lala beegsadaa hablaha da'doodu kala duwan ayada oo ay ku xiran tahay dhaqan beeleedka.

- Qaar ay ka mid yihiin beelo degen Yemen, hablaha waxaa la gudaa labo todobaad marka ay ka soo wareegato dhalashadooda inta badan waxaa lagu gudaa guriga. Wadamada qaarkood gaar ahaan Masar habkaan gudniinka waxay u muuqataa inaysan saameyn ku yeelanin caadadaan oo noqoneysa mid aan sharci aheyn sidaas daraadeed gudniinka inta badan ma muuqdo.
- Dhaqamada kale, hablaha waxaa la gudaa inta ay ka yar yihiin 5 sano jir. Tusaale ahaan Eritereeya iyo Naayjeeriya.
- Welina qeybo kale oo aduunka ka tirsan, hablaha way ka weyn yihiin da'ahaan gudniinkana waa qeyb ka sii balaaran bilowga beeshaas. Hablahaan waxaa la gudaa ka hor inta uu dhiiga caadada ah u imaanin. Tani waa caadiyan hablaha marka ay gaaraan 13 jir ilaa iyo 15 jir taasoo ah da' dhaqameedka inta badan guur la hagaajiyo. Sidoo kale tani waxaa weeye da'da wiilasha lagu soo daro ka mid ahaanshaha beesha.

## 2.3 CAADOOYIN DHAQAMEEDKA GUDNIINKA FIRCOONIGA

Mar mar gudniinka fircooniga waxaa lagu sameeyaa mar qura hablo gaaraya 20 ama ka badan. Waxayba noqon kartaa xaflad weyn, caadiyan waxaa abaabula hooyooyinka, ayeeyooyinka iyo dumarka kaleoo ku weyn beel dhaqameedka taasoo u noqoneysa hablaha dhalinta yar inay ku soo biiraan haweenka hooyooyinka ah.

Hadii ay munaasabadu ay tahay gudniinka **fircooniga nooca III** hablaha waa la xir xirayaa si aysan u dhaqdhaqaaqin marka la gudaayo. Dhaawaca waxaa lagu nadiifiyaa calal ama caleemaha geedaha. Kadib, meeshii kore ee la jaray oo ah baalasha kore ee siilka ayaa la isu keenaa oo la isku tolaa. Ayada oo meesha lagu dhaafayo ib yar oo kaadida iyo dhiiga caadada uu soo maro. Labadii baalal ee la jaray way isku dhegeyaan waxayna sameynayaan xubin adag oo isku tolan. Hablaha la guday waa inaysan dhaq dhaqaaqin todobaadyo si ay u bogsooto dhaawicii.

Qofka gudniinka sameynayo inta badan waa umuliso ama dumarka laga xushmeeyo ee beesha. Mar marna waxaa howsha gudniinka fuliya ninka dhaqan ahaan timaha jara.

Si joogta ah waxaa arintaan ugu lug lahaanaayo shaqaalaha caafimaad eelagu soo tababaray howlaha caafimaadka bulshada. Baaritaano la sameeyay waxay sheegayaan in ka badan kala bar hablaha la gudo la siiyo ay daawada lagu suuxo si ay xanuunka u hilmaan siiyaan – taasoo ina tusinaysa daawooyin dheeraad ah oo loo isticmaalayo gudniinka fircooniga.

# 3 Saameynta Gudniinka Fircooniga

## 3.1 KHATARTA KA IMAAN KARTA GUDNIINKA

Gudniinka fircooniga gaar ahaan marka lagu sameeyo meelaha baadiyaha ah oo leh xaalada caafimaad oo aan fiicneyn, Taasina waxay keentaa halis iyo dhibaato xaga jirka sida: Dhiig bax iyo infekshan. Gabadha waxaa ku dhacaayo naxdin lama filaan ah. Falalka Gudniinka fircooniga dhimashada uu sababo wax war bixin ah lagama haayo.

Isticmaalka loo isticmaalo mindiyo aan sifeysneyn oo lagu gudo koox gabdho ah hal mar waxay taa keeni kartaa in cudurkii infectionka uu sii fido – labada bakteeriyaba mida tetanus iyo mida (vida ee HIV waxaa laga yaabaa in mid ka mid ah oo la gudaayay ee markii horeba xambaarsaneyd bakteeeryada ilaa iyo markii ay dhalatay).

> Hal xaflad lagu qabtay Yugaandha 2007ayaa waxaa laga soo xiganayaa gabar kalkaaliso ah inay xafladaas isugu wada yimaadeen sodon hablood oo gudniinka fircooniga soo wada mareen hal mindi oo aan sifeysneyn loo wada isticmaalay.

## 3.2 DHAAAWACA MASKAXEED

Gabdhaha waxay halis ugu jiraan inay ku dhacdo naxdin lama filaan ah ilaa iyo inta ay ka bogsoonaayaan. Qalitaaan gudniin oo xanuun badan ayaa lagu sameeyay waxaana gaar ahaan lagu sameeyay qaliinkaas xubnaha dumarka xubinta ugu dareenka nugul – waxaana qaliinkaas sameeyay qof dumar oo la aaminsan yahay ama qaraabo ama deriska ah.

Markii ay gabdhihii sii weynaadaan waxaa ku kororta dareen ah in aysan dhameystirneyn. Waxaa laga yaabaa in ay ka dhunto kalsoonidii shaqsiyeed ay laheyd, waxaa laga yaabaa in ay ku dhacaan xaalado wel wel iyo wal bahaar leh waxaana ku soo badata cabsi micno darro ah, sidii ayagoo weerar lagu soo qaaday iyo dhimirka oo isku dhex yaaco.

In badan oo ka mid ah hablaha la guday dhibkooda way la aaamusaan mana qeexi karaan xanuunkooda iyo cabsidooda. Waxayna og yihiin in gudniinka iska caadi yahay taasna ay la qabaan dumar kale iyo dhaqankaba. Laakiin aamus naantaan maskaxeed waxay dhalisaa walaac weyn taas oo weliba la socoto xanuun, cabsi iyo jaahilnimo.

## 3.3 DHIBAATOOYINKA NOLOLEED EE SOO GAARA JIRKA

Marka uu jirku bogsoonayo, waxaa sameysma boog hurguntay oo ah meeshii gabadha laga jaray. Boogta hurguntay looguma talo gelin in la fidiyo. Marka uu sameysmaayo wuxuu bilaabaa inuu dhiso isku xirnaan hurgunta kale, tanina waxay sababi kartaa inay meeshii xiranto. Xubnaha taranka haweenka waa in ay fidaan si ay ugu ogolaadaan inuu dhiigu baxo, kaadida iyo ilmaha dhasha – iyo in ay isku soo ururto xubinta taranka haweenka maadaama boogta hurgunsan uusan fidsameynin wuu jeex jeexmaa intuu fidsami lahaa wuxuuna la yimaadaa daldaloolo (Fistulas) inta u dhaxeysa siilka iyo “kaadi mareenka) ama siilka iyo marinka mindhicirka. Sidaas daraadeed, daldalooladaan ay soo maraan kaadida iyo saxarada waxaa laga yaabaa in markasta ay isk hooraan ilaa iyo mudo dheer. Gabadha waxaa laga yaabaa in looga tago shiir iyo ur iyo xaalad fara ka bax ah. Midee marka haatan ka dhigeyso nolosha gabdhaheena mid la deyriyo oo banaanka loo saaro?

***Kaaadida iyo dhiiga caadada ah***

Gabdhaha waxaa ka yimaada kaadida iyo dhiiga caadada kaasoo bishii hal mar yimaada. jidka ay soo maraan labadaan hoore ayaa laga yaabaa hada in ay ka yar yihiin. sidoo kale waxaa laga yaabaa in ay noqotay nabar bogsooday amaba ay qeyb xiran tahay. aad bay u adag tahay in meesha oo idil la nadiifiyo. infekshanka ayaa ah halis joogto ah.

***Guurka iyo xiriirka galmada***

Nin soo guursaday gabar gudniinka fircooniga III loo soo guday waxaa laga yaabaa inay soo wajahdo dhibaato ah in xaaskiisa uu bikro jabin waayo. Sababtuna waxaa waaye gudniinkii horay loogu sameeyay iyo dhaawacii faraha badnaa. Xasuuso kuwii gooyay baalasha kore ee siilka kadibna isku tolay oo ka dhigay meel dhaawac oo bogsootay oo kale. Ninka habeenkaas waa inuu u qaataa guriga mindi. Wuxuuna kaga jari karaa meelihii inta la isu geeyay oo hadana la isku tolay. Sidoo kale waa inuu jaraa jirkeeda la isku dhajiyay si uu galmo u sameeyo habeenkaas.

## 3.4 HALISTA XILIGA DHALMADA

Cunug isla hada dhashay madaxiisa wuu ka weyn yahay xubintta taranka raga. Sidaan horay u soo sheegnay, boogta hurguntay looguma talo gelin inuu fidsamo. Isla boogta hurguntay oo la jaraayo waa in uu u ogolaadaa kulanka cilaaqaadka galmada ugu horeysa waa in lagu soo celceliyaa si looga dhigo suurta galka uur qaaditaanka.

Intaas kadib, gabadha waa in mar kale loo hagaajiyaa xubinteeda taranka dhaawaca cusub ee dhalmada awgii. Ayada iyo ninkeeda waxaa laga yaabaa in ay codsadaan tolmo kale oo hor leh. Xubinta taranka ee gabadha waa in lagu soo celiyaa sidii markii gudniinka fircooniga III oo kale. Hadii howshaan la fuliyo, dhibaatadii markii hore jirtay ayaa hadana mar labaad u soo noqoneyso gaar ahaan markii la isla gaaro galmada ama dhalmada caruurta.

Qaliinka dhalmada ayaa mar kasta noqoneysa in la sameeyo. Maadaama ay jiraan dhaqamo iyo in la sameysto reer fara badan, isla dhibaatadaas haweenka heysta waxaa dhici karta in ay ku soo noqnoqdaan dhibkaas toban ama sagaal jeer cimrigeeda oo idil.

> Dadka Soomaalida inta badan kuma sameeyaan hablaha tolmo labaad kadib tii hore ee fircooniga; dadka reer Suudaan inta badan way doonayaan toliin labaad.

***Dhibaatooyinka***

Dhibaatooyinka gudniinka fircooniga waxaa ka mid ah in xiliga dhalmada uu cunuga dhalaanaayo madaxiisa uu soo dhaafi Karin Kafka gabadha. Hooyadana waxay halis u gashaa dhiig bax fara badan. Dhibaatadaas iyo kuwa kaleba waxaa laga yaabaa in haweenka u horseedaan dhimasho.

***Dhimashada xiliga dhalmada***

Inta badan ee haweenka fircooniga u gudan marka la bar bar dhigo haweenka aan la gudin, dhimadhada darajada xiliga dhalmada way kaga badan yihiin. Farqiga u dhexeeya labada darajo aad buu u kale weyn yahay:

- Wadanka Ingiriiska cilmi baaris la sameeyay waxay sheegaysaa in dhimashada hooyada xiliga dahlmada waa hal dumar 8000/- oo hooyo ah.
- Malawi oo ah wadan Afrikaan ah oo sabool ah halkaasoo gudniinka fircooniga si

aad u yar looga dhaqmo, hal hooyo ayaa umul raacato marka loo bar bardhigo 217 haween.

- Soomaaliya oo ah wadanka gudniinka fircooniga qeybta III aadka ugu horeeyo aadna looga dhaqan geliyo hal haween ah ayaa ku dhimata xiliga dhalmada marka loo bar bardhigo 100 haween oo dhalaya.

***Halista caruurta***

Gudniinka fircooniga wuxuu kordhiyaa fursadaha caruurta ay ku dhiman karaan dhowr siyaabood. Hey'ada caafimaadka aduunka ee mar la soo gaabsho la yiraahdo WHO ayaa waxay qaaday cilmi baaris kuna sameysay 30,000/- oo dumar ah oo ka kala socday lix wadan. Halista dhimashada caruurta waxay aheyd sida soo socota:

- 15% in ka badan gudniinka fircooniga nooca I
- 32% in ka badan gudninka flrcooniga nooca II
- 55%in ka badan gudniinka fircooniga nooca III

Caruurtii dhalatayna ayaga oo caafimaad qaba, 25% waxay ahaayeen kuwa miisaankooda dhalashada uu aad u hooseeyo ama waxay la dhasheen infekshan aad u daran taasoo xaalada ka sii dhigeysa mid halistii horeba ka sii daran.

***Tusaale: Halka ay ku umul raacdaan dumar fara badan xiliga dhalmada***

Mid ka mid ah qoraayaasha ayaa wuxuu ku qaatay mudo hal sano ah waqooyiga Bariga Africa. Waxay la shaqeysay mashruuc arji loo qoranaayay Shan shaqaalaha oo u dhashay gobolkaas. Sadex ka mid ah ayaga hooyadood waxay dhinteen intii ay da'doodu ay ka hooseesay 6 sano jir. Mid ka mid ahna eedadiis aabihiis qabay ayaa ka dhimatay (hadii ay hooyadu dhimato, reerka ninka xaaska ka dhintay ayaa durbadiiba dumaal u hagaajiya). Shaqaalahaas dhamaantood waxay ii sheegeen in sababta ugu weyn ee dhimashada in ay tahay umul raacasho. Laakiin waxna Kama xusuusan karaan hooyadood: "waxay aheyd dumar oo kaliya".

Afar ka mid ah shantooda shaqaalaha waxay ku noolaayeen baadiyaha waxayna la noolaayeen dumar iyo xayawaano. Markaan ilmo markaas dhashay aan aheyn, ayagaa nuujinta naaska waxay nooga goon jireen xili hore, ku dhowaad lix todobaad. Haweenka nuujiya eeisbitaalka xaafada jooga waxay naguoran jireen caanaha naaskeena nafaqo ku filan ma heystaan. "Anagu waxaan nahay dumar caanaha naaskeenana waa wax qashin ah. Aabaha wuxuu ku maqan yahan dhanka xeebta si ay lacag u soo kasbadaan, meel cidla ah. Laakiin saaxiibadeey markii da'doodu ku soo dhowaatay toban jir, waxaa loo ogolaaday in loo diro dhanka aabahood si ay waxbarasho u bilaabaan. Markii ay inamo qaan gaar noqdeen, aabahood wuxuu u ahaa muhiimada koowaad – laakiin way adkeyd si lagu farax geliyo. Maxaa yeelay waxay ahaayeen odoyaasha beesha iyo mas'uuliyiinta talada gooya. In badan oo ka mid ah waqtigii mashruuca lagu qaban lahaa waxaa qaatay la kulanka odayaasha beesha iyo mas'uuliyiinta qabiilada si loola gor gor tamo. Dumarka looma ogoleyn inay shirka ka soo qeyb galaan marka laga reebo mid umuliso ah waxayna la dhalatay madaxa degmadaas. Waxaa loo ogolaaday in ay ka hadasho laakiin ayadoo taagan albaabkeeda hortiisa. Waxayna u sheegtay qoraaga in sadexdii bil ee ugu dambeysay tuuladaan yar ay ka dhacday dhimasho umul raacasho ah oo sadex hooyo.

# 4 Maxaa Loo Sameeyaa Gudniinka Fircooniga

Hadii ay caadadu tahay mid adag si lagu fahmo, waxaa dhici karta in ay caawiso ma ahan oo kaliya in la weydiiyo saameynta – laakiin yaa caadadaan ka faa'iideysta. Sida iska muuqata waa qaliin jirka dhaawacaya jinsiga bani'aadmka mid ka mid ah. Waa maxay lacagta ay ka kasbadaan dadka sii wada howshaan gudniinka fircooniga?

Ulajeedooyin badan waa kuwa aan marnaba la sheegi Karin. Laakiin guud ahaan meelaha uu ka socdo gudniinka fircooniga kaalinta raga ay ka maamulaan aad baa loo xoojiyaa: waxay doonayaan xaqiijin dhab ah in loo helo caruurta dhalatay inay helaan aabo rasmi ah; hantida ayaana si sax la isugu wareejin karaa. Inkastoo qeybta qiimaha la bixiyay uu yahay raaxadii galmada sariirta oo la adkeeyay ama gudniinka fircooniga nooca III ilaa iyo xad laga dhigay mid aan suuragal aheyn.

***Sababaha lagu andacoodo caadada gudniinka fircooniga***

**#1 Daacadnimada galmada** – marka la jaro kintirka, waxaa la filayaa in dareemihii kacsiga hablaha la dhimay. Waxaana la iska dhaadhiciyay in mar hadii dareenkii kacsiga la nusqaamiyay, in ay jiri doonto fursado yar ay gabadha Gogol dhaaf ku sameyso. Gudniinka fircooniga waxaa la aaminsan yahay inuu gabadha ka dhigo mid nadiif u ah ninkeeda iyo reerkiisaba.

**#2 Guurka** – Bulshooyinka halka uu gudniinka ficooniga ka yahay caadi. Nin dhalin yar oo guur Doon ah iyo reerkiisa marnaba ma aqbalayaan gabar aan la gudin. Sidaas daraadeed reerka gabadha gudniinka ay ku sameeyaan gabadhooda waxay u suuro gelinaysaa in la guursado. Waa arin iska caadi ah oo muujineyso jaceylka iyo daryeelka gabadha loo haayo.

**#3 Lacag** – ku dhowaad inta badan mid awood leh ayaa lacag raasimaal ah ku dhawaaqaya in ay gabadhu qiimahaas taagan tahay. Hadii gabadha sooryadeedii ay noqoto lacag badan, lacagtaas waxay dib ugu soo noqonaysaa reerka gabadha dhalay.

Baahida loo baahan yahay gudniinka fircooniga sidoo kale waxay u xaqiijisaa kuwa qaliinka gudniinka fuliya dakhli joogta ay helaan.Hadii laba meelod meel ay ka imaanayso dakhliga umulisada dhanka gudniinka fircooniga, kuwa gabdhaha guda waxay heli doonaan maal geshi weyn si uu caadada gudniinka u sii socdo.

**#4 Lahaanshaha bulshada** – Gabdhaha aan soo marin gudniinka fircooniga waxaa laga yaabaa in bulsho ahaan la ceebeeyo, in la deyriyo reerka gabadha aan la gudin ay u joogto, iyo in gabadhaas la guur san waayaba. Tani waxay keeni kartaa xanuun maskaxeed oo saameyn ku yeesha gabadha iyo reerkaba. Sidaas darted gudniinka fircooniga wuxuu noqday wadada kaliya ee kuu dhista sumcada bulshada. Gudniinka fircooniga wuxuu u dabaal degaya hablaha wuxuuna ka qeyb noqonayaa dhaqankeeda kooxeed ay la wadaagto gabdhaha kale.

Intii lagu guda jiray dagaaladii sokeeye ee ugu dambeeyay ee Siiraa Liyoon, Laaybeeriya iyo Soomaalya, dad fara badan ayaa la bara kiciyay, la kufsaday, lugahadoodii ama gacmahoodii la gooyay, guryo badan baa la gubay iyo wax ka sii xun. Qaxootigii iyo baro kacayaashii waxay noqdeen wax la arki waayo wadana laheyn. Hadda maadaama ay nabadii soo noqotay, qowmiyado kala duwan ayaa waxay bilaabeen in ay abaabulaan xaflado faro badan. Arimahani waxay awood u siinayaan dadka in ay dhaqan ahaan is leeyihiin qowmiyadooda. Gudniinka fircoonigana wuxuu qeyb ka yahay xafladaha loo qabto gabdhaha, sidoo kale xafladii wiilshana waaba la bilaabay. Wadamadaan aan

kor ku soo xusnay, gabdho tiro badan iyo dumar tiro badan ayaa doonaya in gudniinka fircooniga la sii wado. Sidii gabar waxbaratay oo aqoon leh oo reer magaal ah ay sheegtay: "Arintaan waan ku faanayaa, gabdhahaygana waa gudi doonaa sidii anigaba horay la iigu soo guday.ma doonayo inaan joojiyo. Musliminta waaba waajib. Waana wajahi doonaa wax walbo oo arintaan nooga yimaado maxaa yeelay waa dhaqankeena".

**#5 Diinta** – Tiro ahaan tayada ugu sareysa ee hablaha loo gudo fircooniga waxaa laga helaa qowmiyadaha Muslimiinta ah; sidoo kale waxaa laga helaa qowmiyadaha Kirishtaanka iyo dhaqamada dadka aaminsan wax kasta oo jira inay ruux leeyihiin. Culimada Islaamka iyo kuwa Kirishtanka midkoodna uma arkaan gudniinka hablaha inuu yahay qeyb sax ah oo diinta dhigeyso.

Diimaha qaarkood waxay u arkaan gudniinka raga mid muhiim ah oo laga baaqsan Karin koox ahaan. Laakiin gudniinka hablaha wuu ka duwan yahay. Ololaha weyn qeyb ka mid ah ee ka socda Waqooyig Bari ee Kenya, Sheikh Abdullahi Gudow wuxuu u dhigay sidatan:

*"Imaamyada masaajidyada oo fara badan ayaa daraasaad baaritaan arintaan ku sameeyay, waxayna isku raaceen: Diinta Islaamka waxay faraysaa gudniinka raga laakiin hablaha maya. Ilaaahay wuxuu idiin abuuray muuqaalkii ugu quruxda wanaagsanaa, kuwa lehna kintirka ma haboona meesha inuu ku yaalo, ma waxaad su'aal ka keenaysaan cilmiga abuurka ilaahay?"*

# 5 In Isbedel Lala Yimaado

## 5.1 FAHAMKA CILMIGA HADA SOCDA, DABEECADAHA IYO CAADOOYINKA

— Maxay dadka ka garanayaan gudniinka fircooniga iyo saameyntiisa?

— Maxay ka filayaan in diintooda arintaan ay ka leedahay?

— Maxay tahay arigtida dumarka eek u aadisan waxay ka doonayaan lamaanahooda iyo bulshada ay la nool yihiin?

Gudniinka fircooniga fikradaha laga qabo inta badan waa arimo xaqiiqo dhab ah oo isku duuban, xaqiiqooyin dhab ah oo aan dhameystirneyn, iyo fikrado iska micno daro ah. Aragtiyo, xaqiiqooyin, been ayaa la isla wadaa meesha, laakiin way iska hor imaanayaan. Laakiin waxaa jira ififaalo geedi socod. Kuwa si aad ah ugu daba dhacsan gudniinka fircooniga inta badan waa:

- Dumarka waawyn da' ahaan.
- Ragga.
- Dadka ka soo jeeda asal ahaan wadamada saboolka ah.
- Dadka aan heysan waxbarasho.

Dhab ahaantii, dumarka ayaa ka badan tirada raga kuwaas oo doonayaa in caadadaan gudniinka ay sii socoto. Raga inta badan wax yar ayay ka garanayaan xaqiiqda dhabta ah ee gudniinka fircooniga maxaa yeelay ilaa howaanahaan waxay arintu ahaan jirtay arimaha dumarka oo kaliya. Raga iyo dumarka is qabana sida caadada ah ma garanayaan fikradaha ay kala qabaan.

## 5.2 KAALINTA DHAQTARKA, KALKAALISADA IYO DAWEYNTA

Barnaamijyada waxbarasho eek u saabsan gudniinka ficooniga waxaa inta badan lagula beegsadaa umulisooyinka maxaa yeelay caadiyan ayaga ayaa ah kuwa hablaha guda. Umulisooyinka waxaa lagu dhiiro geliyaa inay xoqitaaka ugu yar ay ku sameeyaan kintirka ayada oo arintaas rajo looga qabo in gudniinka uu noqdo astaan oo qura, mudo yar gudaheedana meesha laga waayo gudniinka.

Hase yeeshee in badan waxaa fuliya gudniinka dhaqaatiir, shaqaale, iyo kalkaalisooyin si xirfad leh ugu tabo baran arimaha caafimaadka. Qoysaska waxayba u arkaan kuwaan in ay yihiin kuwa ka badbaado iyo kana nadaafad wanaagsan umilsooyinkii aan tababarka laheyn. Dadka ku nool wadamada gudniinka uu sharci daro ka yahay waxay gabdhahooda ugu kaxeeyaan fasax wadamada uu sharciga ka yahay gudniinka, isbitaalada howsha fuliyana waxayba isticmaalaan kaarka bangiga ee deynta hormariska ah.

Waxaana arinta ku lug leh dhamaan dad madax ah. Dhaqaatiirta iyo kalkaalisada waxaa looga baahan yahay in ay xasuustaan mid ka mid ah aasaaska waxa la soo baray oo ah: “wax dhaawac ah ha geysan” iyo tan labaad oo ah: “Weligaa ha dhaawicin xubinta jirka ee caafimaad qabta”.

Jawaabta dhaqaatiirta xirfada leh eek u aadisan gudniinka waa in ay ahaataa; “Maya”. U dhaqdhaqaadida dhanka sharciga iyo cuno qabateynta in la xoojiyo waxay u baahan tahay in talaabo la qaado.

Si kastaba ha ahaatee. Dhaqaatiirta ku taqasusay qaliinka ayaa loo baahdaa xiliga dhalmada cunuga arintuna waxay ku lug leedahaya xubinta dhalmada hooyada oo tolan. Dumarkaan waxay halis u yihiin xanuun dheeraad ah iyo dhimasho – waxay u baahan yihiin taxadar iyo daryeel dheeraad ah inta laheli karo oo suurto gal ah.

> Wadanka **Kiinya** gudniinka hablaha waa sharci daro. Laakiin wadanka waxaa ka mid ah malyan dad Soomaali ah oo hablaha u guda gudniinka ficooniga midka ugu xanuunka iyo jaritaanka badan.

Meel kasta oo wadanka ka tirsan waxaa ka socota daweynta gudniinka oo inta badan ay sameynayaan si sharci daro ah dhaqaatiir si xirfad leh loo soo tababaray waxayna ugu tagaan qoysaska guryahooda. Hablihii gudniinka lagu sameeynaayay wayba ka da’ yar yihiin sidii markii hore, hada waxaaba lagu gudaa inta aysan da’doodu gaarin afar jir.

Sidaas oo ay tahay waxaa jira ilaa iyo xad hoos u dhac ku yimid gudniinka hablaha ee Kiinya. Hablaha da’doodu u dhexeyso 15 jir ilaa iyo 19 jir ayaa waxaa muuqata inta badan in aan la gudin marka loo bar bar dhigo dumarka da’doodu u dhexeyso 45 jir ilaa iyo 49 jir.

Dhibaato kale oo aad u weyn waxay imaataa dhalmada ilmaha ka dib. Hooyada ilmaha dhashay iyo ninka qaba waxaa laga yaabaa inayba codsadaan in hooyadii ilmaha dhashay mar labaad la tolo si loogu celiyo sidii markeedii hore ee toliinka xoogan. Falkaana waxaa dhici karta in ay ku soo cel celiso dhibaato hor leh markasta oo ay hooyadu ilmo dhasho. Dhaqaatiirta iyo kalkaalisada codsigaan oo kale ay soo wajahdo lagama yaabo inay leeyihiin macluumaadkii, tababarkii iyo taageeradii go’aan lagu gaari lahaa. Sidaas daraaded way ka aqbalaan in mar labaad la tolo. Sidaan aan soo sheegnay qeyb kale oo dhibkii ka mid ah ayaa la daweeyay.

***Tusaale: Daweyn aad loo tixgeliyo***

Wadanka Ingiriiska dad baa waxay ogaadeen inay wadanka ku nool yihiin qaxooti aad u fara badan oo ka kala yimid wadamada gudniinka fircooniga uu ka sharciyeysan yahay – talaabooyin cilmi ku dhisan ayaa waxaa lagu bilaabay in la caawiyo hablihii ka soo badbaaday gudniinka fircooniga.

Maadaama uu isbitaal kasta uu leeyahay shaqaale caafimaad oo isku bedela waajibaadka, waxay u baahan yihin inay la yimaadaan tababaro dheeraad ah, si uu qof kasta xog ahaan u ogaado dhaqanka iyo dabeecadaha iyo baahida is xushmeynta iyo is fahamka. Sidaas daraadeed hada waxaa abuuran sideed dhaqaatiir takhasus u leh African well Women's Clinic kuwaas oo hada helay waayo aragnimada iyo cilmiga loo baahan yahay. Isbitaal kasta waxaa la geeyay umuliso soo qaadatay caafimaad guud ee bulshada iyo daryeelka dumarka la soo guday ayada oo la socoto qof dumar ah oo ka caawineysa wixii ku saabsan talo bixinta iyo waanada iyo gabar kale oo qaabilsan tarjumaada luqada.

Isbitaalka wuxuu qabta arimaha soo socda:

- Talo siin, wacyi gelin, waxbarasho iyo tababar.
- In la fuliyo qaliin lagu furaayo tolmada hablaha la guday gaar ahaan xiliga dhiilo aysan jirin kuwa uurka leh iyo kuwa aan uurka laheyn.
- In la hagaajiyo meeshii la xiray.
- Soo celinta dareenkii kintirka ee gudniinka fircooniga.

***Tusaale: Dhanka rajada wanaagsan – soo celinta dareenkii kintirka***

Halkaan waa meel ay ku howlan yihiin dad waayo aragnimo iyo takhasus dheeraad ah leh. Dumarka qaar ka mid ah waxay jeclaan lahaayeen in ay wajahaan dareenka jirkooda, siigeysiga iyo raaxada galmada. Labada qof, raga iyo dumarka inta badan waxay u arkaan wadaaga raaxada qancinta galmada arin xoojineysa xiriiirka wada noolaanshahooda.

Mararka qaarkood, gabadha kintirka laga jaray waxay dareemi kartaa raaxada galmada waa hadii uu ninka galmada kiciyo oo waqtina qaato. Qaar ka mid ah dumarka waxay doonayaan in loo hagaajiyo si ay kor ugu qaadaan awooda dareenka kacsiga. Kintirka waa sidii dhirta caleenteeda oo kale hoosna ku leh xidid dheer. Qeybta muuqata oo caleenta umbaa la jaray laakiin xididkii weli meeshiisa ayuu ku yaalaa wuuna shaqeynayaa hadii ninka uu galmada kiciyo. Hilibka ku wareegsan kintirka ayaa qaliin kale lagu sameyn karaa si loo soo bixiyo xididka intiisa hartay waxaana dib u soo noqonaya dareenkii.

Laakiin waa qaliin aad halis u ah oo adag waxaana sameyn kara oo kaliya dhaqaatiirta qaliinka sameeya kuwa gaarka ah.

## 5.3 TXUBNAHA MUHIIMKA AH EE ISBEDELKA

Maxaa la qabtaa kumaa qabanaya howsha?

***Sharci dejiyaha iyo sharci ilaaliyaha***

Wadamo fara badan gudniinka sharci ahaan lama ogola. Wadamadaan waxaa ka mid ah dhamaan wadama ku yaala waqooyi (Yurub, Mareykanka iwm). Afrika sawirku waa mid isku dhex yaacsan. Tusaale ahaan, Laaybeeriya, Siiraa liyoon iyo Soomaaliya wax sharci oo xakameenaya gudniinka Kama jiraan. Wadanka Soomaaliya suurto gal ma ahan in la dhaqan geliyo sharci ayaga oon lala kaashanin odayaasha beesha. Meel kasta uu ka jiro sharci marin ka dhan ah gudniinka, dhaqan gelinta iyo ka miro dhalinta tan koowaad oo ah in la rumeysto ayaa ah muhiimad aad u baaxad weyn. **(ref 5)**

***Hogaamiye diimeedka iyo hogaamiye dhaqameedka***

Dadka aad ka loo xushmeeyo bulshada dhexdeeda ayaa noqon kara xubnaha awood u leh in ay isbedel keenaan. Waxay awood u leeyihiin in ay saameeyn ku yeeshaan go'aamada qoysaska iyo in ay dhisaan tiro koox kooxo beeleed. Sidaas daraadeed waxay awood u yeelan karaan in ay ka galaan kaalin libaax in gabi ahaanba la joojiyo gudniinka.

***Waalidiinta, awoowe iyo ayeeyo***

Dhaqamada kala duwan waxay ku xoojiyaan xubnaha qoysaska awoodo kala duwan. Inta badan aabayaasha ayaa go'aan ka gaaro shaqada uu qabanayo wiilkiisa halka ay ayeeyada ay gacanta ku dhigto daryeelka caruurta, gudniinka iyo abaabulka guurka. Mar marka qaarkood, hal qof oo awood leh ayaa is bedel ku sameeya caadada soo jireenka ah. Hadii la xoojiyo waxbarashada ilaa heer tuulo la hor mariyo, mashruuca waa in uu gartaa qofka taagan booska awooda oo xaqiiqdii wax bedeli kara. Tusaale ahaan, ayeeyooyinka waxay u baahan yihiin in laga caawiyo fahamka khatarta uu wato gudniinka una leeyahay hablaha ayaga ka soo farcamay: Taas oo ah halista uu ku haayo gabdhahooda iyo kuwa ay sodohda u yihiin oo umul raaacanaya caruurtii ay ayeeyada u ahaayeena halkaas ku dhimanaya.

***Hey'adaha Xuquuqda Bani'aadamka***

Gudniinka waa arin quseysa xuquuqda bani'aadamka – falkaan ma lahan wax faa'iido xaga jirka ah xoog ayaana loo isticmaalaa hablaha yar yar oo weli gaarin da'da ay wax ku ogolaan karaan. Dhowaanahaan dadka waxay bilaabayaan si tartiib ah in ay aqbalaan muhiimada qof kasta inuu xuquuq leeyahay – taas oo ka maqneyn ilmo afar bil jir ah.

## 5.4 HEY'ADAADA KAALINTEE BAY KA QAADAN KARTAA

Qofka aqrinaayo buugaan, waxaa laga yaabaa in aad ku lug leedahay falalka gudniinka fircooniga. Hadii aad u shaqeysid hey'adaha gargaarka oo aad awood u leedahay in aad hadal jeedin karto, waxaa dhici karta inaad arimahaan ka fikirto:

- Shaqaale u shaqeeya hey'ad kastaoo qiimo leh waa inuu ogaadaa heerka gudniinka ee degmada uu ku nool yahay. Waxaa lagaa doonayaa in xubnaha shaqaalaha oo dhan in si fiican loo wacyi geliyo, in maskaxdooda ka gartaan arintaan – hadii ay doonayaan in gudniinka meesha ka baxo - waa in ay awood u lahaadaan in ay ka doodi karaan kana hadli karaan gudniinka. Sidaas awgeed, si loo meel mariyo arintaan. Hey'adaadu maxaa looga baahan yahay in ay qabato?

- Waa inaad xisaabta ku darsataa degmadaada ama gobolkaada si fiican ma looga warqabaa gudniinka fircooniga (cilmi ahaan, dabeecad ahaan, caado ahaan) marka loo eego qabiilada waa weyn ee beelaha meesha degen. Ma loo baahan yahay cilmi baaris hey'adaadana ma awoodaa in ay talaabadaas qaadi karto?
- Waxaad eegi kartaa howlaha ay wadaan hey'adaha iyo mashaariicda waxaadna arki kartaa hadii ay bixinayaan fursad lagu faafinaayo wacyi gelinta iyo ulajeedada arimaha gudniinka fircooniga.
- Waxaad su'aali kartaa shaqaalaha caafimaadka ee ka howl gala degmadaada hadii ay ka shaqeynayaan dhibaatooyinka gudniinka fircooniga.
  — Hey'adaha miyey helayaan tababaro ku saabsan farsamooyinka ay u baahan yihiin si ay ula tacaalaan gudniinka fircooniga?
  — Ma jiraan howlo waxqabad u leh ciribtirka gudniinka?
  — Maxaa loo baahan yahay si looga dhigo arintaan mid guul laga gaaro?

***Nasiib wacan howl kasta oo aad bilowdo oo ka dhan ah gudniing fircooniga.***

***Tusaale: Howlo looga soo horjeedo gudniinka fircooniga ee dalka Senegaal***

**Howlaha ilaa heer dowladeed:** Sandadkii 1999 Senegaal waxay hir gelisay sharci si gaar ah loogu gol leeyahay gudniinka laakiin sida wadamada kale qaarkood wax talaabo oo wax ku ool ah lama qaadin – ilaa iyo 2006 markaas oo ay soo ifbaxday in gabar sideed iyo toban bilood jir ah la guday. Waalidiintii, ayeeydii, iyo qofkii howsha fuliyay dhmaantood dacwo maxkamadeed ayaa u bilaabatay kadibna waxaa lagu xukumay in xabsiga la dhigo.

**Jawaabihii xaga diinta iyo warbaahinta:** dadka badankiis waxay ku noqotay wax laga argagaxo. Taasina waxay sababtay in hogaamiyeyaasha diinta ee wadanka ay dibadbaxyo iyo khudbado ay soo jeediyaan kuna difaacayaan gudniinka fircooniga. Laakiin waxaa la qabtay dood ku saabsan arintaan oo hirgeliyeen idaacada raadiyaha. Sanadkii 2010, waxay soo saareen hogaamiyeyaasha diinta ee dalka Muritaaniya mowqif adag oo diinta Islaamka ah oo cambaareenayo gudniinka fircooniga – hogaamiyeyaasha qabiil ahaan iyo diin ahaanba isku xulufo ah dadka ku dhaqan waqooyiga dalka Senegaal.

**Waxqabadka hey'adaha ilaa heer degmo:** Hey'ad madaxbanaan oo Senegaal ah oo lagu magacaabo Tostan ayaa ka howl gasha degmooyinka gudniinka looga dhaqmo. Waa in marka hore lagu marti qaadaa imaatinka degmada ka hor inta aysan wax howl gal bilaabin. Waxay sameeyeen labo kooxood oo xog doon ah, mid waxa uu ka koobnaa ku dhowaad sodon dad waaweyn ah da'ahaan iyo mid ka kooban ku dhowaad sodon dhalinyaro badankood waxay ahaayeen dumar laakiin dhamaantood ma aheyn dumar. Kooxahaan waxay kulmayeen ku dhowaad todobaadkii sadex jeer mudo sadex sano ah. Ardaykastana waa inuu u gudbiyaa waxyaabihii la soo baray qof kale kaasoo looga baahan yahay sida la doonayo inuu asagana qof kale u sii gudbiyo.

Sanadkii ugu horeeyay waxay barteen arimo ku saabsan xuquuqda bani'aadamka, caafimaadka, dimoqraadiyada iyo habka xalinta dhibaatooyinka. Sanadkii labaad waxay barteen aqoonta asaasiga iyo sida taleefanka gacanta loo isticmaalo. Sanadkii sadexaad waxay barteen maaliyada yar yar iyo sida loo hormariyo arji codsi qoraalka. Codsiyo wanaagsan ayaa la gudbiyay si loo helo deeq lacageed.

Gudniinka fircooniga wuxuu gaar ahaan soo galayaa dhanka arimaha xuquuqda

bani'aadamka sidoo kale wuxuu ku yahay halis caafimaadka. Baahida ah in meel looga soo wada jeesto gudniinka fircooniga wuxuu u dhaci karaa sidii mashruuc arji qoraal oo kale. Hal degmo ayaa u abaabushay dadkeeda in ay joojiyaan gudniinka. Si kastaba ha ahaatee, tani waxay ka dhigtay buuq, kheylo iyo sawaxan weyn markii aroos badan uu ka dhacay degmadaas sidoo kale wuxuu ka dhacay kooxo kale oo ilaa iyo sadex iyo toban degmooyin oo kale. Sidaas daraadeed waxaa waajib noqotay in hadana mar kale waxbarashadii iyo abaabulkii dib looga bilaabo dhamaan sadexda iyo toban oo degmo.

Hey'ada wax ay sheeganaysaa in ka badan afar kun oo degmo sida ay leeyihiin in ay joojiyeen gudniinka 77% ayaa si dhab ah u sameeyay.

**Fiiro gaar ah**: Mashruucaan wuxuu cilaaj ku sameynayay isaga oo ka mid ah dhowr arimo oo kale ay ku jiraan wax aqris – qorid la'aanta, iyo shaqo la'aanta. Wuxuuna u muuqdaa mid helay kaalmo dhaqaale maaliyadeed in ka badan mashaariicda kale ee horumarineed. Caadiyan, suuro gal maaha in la helo kaalmo dhaqaale oo sadex sano oo lagu qabanaayo shaqo bilow ah, iyo in ay fududaato wadadii lagu heli lahaa lacag amaah oo yar yar iyo taleefanada gacanta. Mashaariicda fiican waxay u baahan yihiin dhaqaale fiican hadii la doonayo in lagu guuleysto.

# 6 Tixraac iyo akhris dheeraad ah

***Ticraac***

1. Tirokoob – who.int/reproductivehealth/topics/fgm/overview/en
2. Dhaqanka iyo Xuquuqda: Gudniinka fircooniga ee hablaha afrikada Galbeed Plan International – plan-international.org/files/global/publications/protection/femalecutting.pdf
3. Gudniinka fircooniga ee hablaha Bariga Dhexe – stopfgmmiddleeast.wordpress.com/countries/yemen/
4. "Sharciga la xiriira gudniinka hablaha ee wadanka Ingiriiska iyo u dhaqan gelinta sharci ahaan" (Kwateng-kluvitse A., 2004). Waxaa lagu qiyaasaa wadanka Ingiriiska 22,000 hablo ah waxay halis ugu jiraan in la gudo, 279,500 hablo ahna mar hore ayaaba la soo guday. Hey'ada u ololeysa arimahaan oo lagu magacaabo Daughters of Eve ayaa waxay wadaa wacyi galaan balaaran waxayna isku dayaysaa in la joojiyo gudniinka hablah – dofeve.org
5. Shuruucda – warisdirie.files.wordpress.com/2010/11/prevalence-of-fgm-and-laws1.pdf

***Aqris dheeraad ah – Guud ahaan***

"Gudniinka fircooniga ee hablaha" (ed. Momoh Comfort) wuxuu leeyahay qodobo fara badan iyo qoraa. Buugaan wuxuu aad u caawinayaa isbitaal kasta oo ku yaala Waqooyiga doonayana in uu bilaabo shaqo waxtar leh oo ku saabsan gudniinka hablaha diiradana lagu saarayo caafimaadka iyo xooga shaqaalaha. Waxaad kale oo ka heli kartaa online at Google Books:
http://books.google.nl/books?id=dVjIP0RfVAMC&printsec=frontcover#v=onepage&q&f=false

Tixraaca Wikipediya inta badan ma saxsana. Si kastaba ha ahaatee kuwaan hoos ku qoran ayaa inta badan sax ah oo mar kastala cusbooneysiiyaa:
http://en.wikipedia.org/wiki/Female_genital_mutilation.

La soco sida loola dagaalamo daweynta - "Global Strategy to Stop health-care providers from performing FGM" (pdf xataa waxaad ka heli karta asaga oo Af Carabi ah):
https://www.unfpa.org/public/home/publications/pid/7922

***Aqris dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadka qofka***

Ka hortaga iyo abaabulka maareeynta dhibaatooyinka gudniinka hablaha kuna saabsan duruus caafimaad oo ku aadan kalkaalisada iyo umulisada: "Female Genital Mutilation: Integrating the prevention and the management of the health complications into curricula of nursing and mid-wifery" (pdf asaga oo ku qor afka faransiiska).

- Buuga ardayga:
  http://www.who.int/reproductivehealth/publications/fgm/RHR_01_17/en/
- Buuga macalinka:
  http://www.who.int/reproductivehealth/publications/fgm/RHR_01_16/en/